



Wax barashada fog

Dugsiyada Dadweynaha ee Federal Way



In kasta oo dugsiyadu xiran yihiin, hadana waxaan sii wadnaa inaan diirada saarno sidii aan uga taageeri lahayn ardayda waxbarashadooda. Bilowga xiritaanka, waxaan boostada ugu dirnay casharo ku saleysan guriga iyo nashaadaadyo wax barasho oo loogu talagalay ardayda si ay ugu dhaqmaan waxbarashadooda. Ardaydu waa inay sii wadaan shaqadooda taniyo illaa Abriil 17, 2020.

Laga bilaabo Abriil 20, waxaan bixin doonaa ikhtiyaar dheeraad ah oo wax lagu barto oo fog.

Waa maxay wax barashada fog?

WAX BARASHADA FOG WAA	WAX BARASHADA FOG MA'AHAN
<ul style="list-style-type: none"> Casharo toddobaadle ah iyo nashaadaadyo, oo ka kooban agabyo iyo waxyaabo aan dijital ahayn, oo ardaydu uga shaqeeyaan si madax-bannaan oo u gudbiyaan macallinkooda Moodar tilmaam ah oo dhici kara wakhti kasta - ardaydu si madaxbanaan aye u dardar geliyaan waxbarashadooda mar haddii barayaashu la wadaagaan ilaha Xiriirka macallinka ee taleefanka, emaylka, Kanfaska iyo Zoomka Macallimiintu waxay ardayda siiyaan fursad ay ku bixiyaan saacadaha xafiiska dugsiyada iyo / ama jawaab celinta taleefanka ee ardayga 	<ul style="list-style-type: none"> Beddelka tilmaamaha maalinlaha ah ee caadiga ah iyo khibrada hodanka ah ee ka dhacda dugsiyada fool ka fool ah Dugsi internetka ah Kaliya wax barashada dhijitaalka ah

Maxaa macno ah ee tani aniga ii leedahay?

ARDAYDU WAA INEEY	QOYSASKA WAA IN AY
<ul style="list-style-type: none"> Fiiri Kanfaska maalin kasta oo Isniin ah kuna dhammee meeleyaha la bixiyo toddobaad kasta Ku xirnow macallinkaaga (yada) toddobaadkiba mar adoo adeegsanaya emayl iyo Zoom ama Kanfas fiidiyow La xiriir macallinkaaga haddii aad u baahan tahay caawimaad ama aad su'aalo qabto Dhammeystir howlaha kale ee barashada, sida aqriska ama marin u helida ilaha internetka 	<ul style="list-style-type: none"> Ka taageer jadwalka maalinlaha ah ee wax barashada guriga Sii fursad ay ardaydu wax ku bartaan oo ay ku dhammaystiraan shaqada La xariir cunugaaga macallinkiisa (yaasha) isbuuciiba mar adoo adeegsanaya emayl ama Zoom ama Canvas video

Noocee casharo iyo nashaadaadyo ah ee ayaan filan karaa inaan arko?

Macallimiintu waxay soo bandhigi doonaan waxqabadyo dhijitaal ah iyo / ama kuwa aan dhijitaal ahayn qaybaha soo socda ee ah siyaabo kala duwan oo ay ka mid yihiin casharo fiidiyoow ah oo horey loo duubay, casharo live ah, mashruucyo fudud, howlo warqad / qalin qori. Hawlahan ayaa loogu talagalay ku celcelinta iyo ra'yi celinta macallinka.

Xanaanada Kahor	Fasalada Xanaanada-2	Fasalada 3-5	Fasalada 6-12	Fasalada ugu dambeeyo Dugsiyada Sare
<ul style="list-style-type: none"> Wada akhri Firfircoonaanta jirka Hawlaha xisaabta 	<ul style="list-style-type: none"> 30 daqiiqo maalin kasta oo lagu daro akhri madaxbanaan iyo dhaqdhaqaaqa jirka 	<ul style="list-style-type: none"> 60 daqiiqo maalin kasta oo lagu daro akhri madaxbanaan iyo dhaqdhaqaaqa jirka 	<ul style="list-style-type: none"> Hal leeyli koorso kasta isbuuciiba Inadan dhaafin wadarta 3 saacadood maalintii 	<ul style="list-style-type: none"> Dugsiyada Sare iyo waxyaabaha ka baxsan Qorshaha Kala shaqee macallimiinta gudbinta shaqada si aad u buuxisaan heerarka

Wax barashada fog Dugsiyada Dadweynaha ee Federal Way (sii waday)

Sababtoo ah helitaanka qaar ka mid ah agabyadan waxay ku noqon kartaa wax ku cusub waalidiinta, barayaasha fidiyoowga ee sida loo isticmaalo ilahaan ayaa laga heli doonaa laga bilaabo Jimcaha, Abriil 10, 2020 ee <https://www.fwps.org/ParentPortal>.

ParentVUE

Si aad u isticmaasho ParentVUE, booqo <https://grades.fwps.org/>.

ParentVUE waxay u oggolaaneysaa wada-xiriirka labada dhinac ee u dhexeeya macallimiinta iyo waalidiinta oo ku kala baxa luqado badan. Si aad u hesho farriimo ku qoran luqad aan ahayn Ingiriisiga, fadlan deji luqadda aad doorbideyso bogga soo-gelitaanka ee ParentVUE moobiil appka.

Marka cunugaada macallinkiisa u diro farriin dhanka ParentVUE, waxaad heli doontaa emayl ku jira fariinta. Si aad uga jawaabto farriintan, waa inaad gashid koontadaada ParentVUE. (Ha uga jawaabin noreply@fwps.org ogeysiiska emaylka.)

Hadaad ubaahantahay caawimaad xaga ParentVUE, booqo <https://www.fwps.org/ParentPortal> ama emayl grades@fwps.org.

Wicitaanka taleefoonada

Xilliga xiritaanka, macallimiintu waxay isticmaali doonaan Google Voice. Lambarku wuxuu ka muuqan karaa koodh kale oo ka duwan kan deegaanka juqraafi ahaan ku yaal. Google Voice waa laba-dhinac, taas oo macnaheedu yahay waalidiinta inay soo wici karaan nambarka isla markaana fariin uga tegi karaan haddii loo baahdo.

Fariin qoraal

Haddii aad dooratay in aad wax u qorto, waxaa suuragal ah in aad hesho farriimaha hal-ku-qorka ah ee hal qaab ah taasoo ka socota iskuulkaaga iyo degmadaada. Dugsiyada qaar waxay lahaan karaan wax dheeri ah habab loogu isticmaalo laba-hab oo wax ku qorista macallinka ilmahaaga, oo leh barnaamijyo ay ka mid yihiin Xusuusin. Fariinta labada-hab ee degmada oo dhan la leh Xusuusin ayaa dhowaan soo socota.

Sida loo helo kulamada shirarka Zoom

Cunugaaga macallinkiisa ayaa kuu soo diri kara casuumaad si aad uga qeybgashid kulanka fidiyowga ee Zoom. Si aad ugala soo baxdid kulankan kombuyuutar, dhagsii isku xirka lagu soo bandhigay martiqaadka. Si aad ugala soo baxdid kulankan taleefanka, waxaad soo wici kartaa lambarka la siiyay ama kala soo bixi kartaa barnaamijka taleefanka ee Zoom-ka at <https://www.zoom.us/download>.

Sida loo helo Canvas

Sida loo helo Canvas, Booqo <https://fwps.instructure.com/> ama kahel dhanka Clever. Magaca ardaygaagu waa Aqoonsigooda Ardayga, iyo koodhkiisa si la mid ah kan loo isticmaalo in lagu galo kombuyuutarrada dugsiya.

Wixii faah-faahin dheeraad ah waxaa laga helikaraa <https://www.fwps.org/parentportal>.



Tilmaamo ah inaad carruurtaada kala hadashid COVID-19, oo ka timaadda CDC

- Is deji oo xasilloonow.
- Naftaada u diyaari si aad u dhageysato oo aad u hadashid.
- Ka fogow luqadda eedeyn kara dadka kale una horseedi kara dhaleeceyn.
- U firso waxa carruurta ku arkaan ama ku maqlaan telefishanka, raadiyaha, ama internetka.
- Bixi macluumaad si daacad ah oo sax ah.
- Bar carruurta tilaabooyinka ku haboon (Nadaafada) maalin kasta si loo yareeyo faaftaanka jeermiska.



**FEDERAL WAY
PUBLIC SCHOOLS**